



# Pae ora | mustaqbal caafimaadka leh ee loogu tallogalay dhammaan dadka reer New Zealand

## Bayaanka Xeerka Dowladda ee loogu tallogalay Caafimaadka: 2022–2024

E ngā mātāwaka huri noa, tēnā koutou katoa

Waaxdeena caafimaadka waxay leedahay aasaas xoogan: shaqaale aad u xirfadeysan oo ay ka go'antahay shaqada, bulshooyin ka qeybgal leh oo dareen leh, iyo awood si wadajir ah loogu shaqeeyo oo loogu sameeyo howlaha markii aan u baahano. Laakiin waan ognahay inay jiraan fursado lagu sameeyo hormarino oo waxaan u baahannahay inaan dhisno nidaam caafimaad mustaqbal ah ee noo sameeyo wanaag dhammaanteen.

Muddo aad u dheer, natiijooyinka caafimaadka kala duwan oo dhan, isla kooxaha ayaa si joogta ah aan loogu adeegin oo laga tagay: Māori, Dadka jasiiradaha, dadka curyaanka ah, iyo kuwa la kulmo sinnaan la'aanta ku saleysan xaaladooda caafimaadka, dhaqanka, qowmiyada, jinsiga, aqoonsiga galmada, meesha ay ku noolyihiin, daqligooda iyo xaqiiqaha kale.

Nidaamka cusub ee caafimaadkawuxuu bixiyaa fursad wax loogu qabanayo dhibaatooyinka muddada jiray oo abuurto nidaam ah iswaafaqsanaanta—Te Tiriti, ee loo simmanyahay, isku xirnaan, oo xudun u ah qoyskā. Sameeynta sidaas, waxay noqoneysaa mid waarta, adkeysii leh, oo la goyn karo, iyada oo hubineyso inay halkaas u joogto jiilka mustaqbalka oo ay u suurto galeyso ka soo kabsiga caqabadaha mustaqbalka.

Hamiladeena way sahlantahay: taasi in dhammaan dadka reer New Zealand gaaraan pae ora (mustaqbal caafimaadan). Tan waxay la micna tahay in dadka iyo qoyskā ku noolaadaan muddo dheer caafimaad wanaagsan, lahaadaan caafimaad hormarsan iyo nolol tayeysan, oo ka qeyb noqdaan bulshooyinka caafimaadan, loo dhanyahay oo adkeysii leh, oo ku noolaadaan jawiyo waariyo fayyo qabkooda.

Bayaanka Xeerka Dowladda ayaa tilmaamayo filashooyinka Dowladda ee nidaamka caafimaadka si loogu diyaariyo adeegyada, barnaamijyada iyo iskaashiyada lagu illaaliyo, ee sare loogu qaado oo lagu hormariyo caafimaadka iyo fayyo qabka, laguna gaaro sinnaan, oo ay bixiso mustaqbal caafimaadan.

Kuma gaareyno isbadel habeen kaliya: waxay u baahaneyso waqti, maalgelin iyo dhammaan shirkadaha iyo dadka ee waaxdeena caafimaadka inay wada shaqeeyaan. Bayaankaan Xeerka Dowladda ku meelgaarka ah wuxuu ku bilaabaa safarka, iyada oo la dajinayo mudnaanada Dowladda iyo filashooyinka labada sanno ee ugu horeyso ee nidaamka la habeeyay.

Nō reira, tēnā koutou katoa

Andrew Little, Wasiirka Caafimaadka

### Bayaanka Xeerka Dowladda ku meelgaarka wuxuu ku haggaa nidaamka caafimaadka cusub

oo waxay dajisaa mudnaanada, ujeedooyin, iyo filashooyinka nidaamka caafimaadka sida guud loogu maalgeliyay ee Aotearoa New Zealand.

Waxay tilmaantaa waxa Dowladda ka filaneyso in la gaarsiiyo oo lagu gaaro gudaha nidaamka caafimaadka, sidoo kale sida sida guusha lagu cabirayo, lagu kormeerayo, oo lagu soo wargelinayo.

Bayaanka Xeerka Dowladda ku meelgaarka ah waxay diirada saartaa labada sanno—laga bilaabo Luuliyo 2022 illaa Juun 2024—oo waxay bixisaa

aasaaska jaheyn muddo dheer iyo natiijooyinka la filanayo oo qaadanayo waqti badan in lagu gaarsiiyo.

Waxay sidoo kale dajisaa filashooyinka Qorshaha Caafimaadka New Zealand, kaas oo tilmaamo sida kala duwan ee shirkada caafimaadka u gaarsiiyaan mudnaanada Dowladda iyo adeegyada caafimaadka dhammaan dadka reer New Zealand.

### Dokumintiga Bayaanka Xeerka Dowladda ku meelgaarka buuxo waxaa laga heli karaa websaydka Wasaarada Caafimaadka.

# Mudnaanada ugu muhiimsan

**Bayaanka Xeerka Dowladda wuxuu leeyahay lix aagag mudnaan ah ee ku hagayo nidaamka caafimaadka iyo sida adeegyada loo gaarsiyo.**

## Ku gaarista sinnaan ee natiijooyinka caafimaadka

Dadka qabo baahiyada kala duwan iyo heerarka faa'idada waxay geli karaan qaabab kala duwan iyo illaha lagu helayo natiijooyinka caafimaadka loo dhan yahay. Nidaamka la habeeyay tan waxay u muuqan kartaa:

- Ka shaqeynta dhinaca sinnaanta caafimaadka iyo faydada qabka
- Aqoonsashada xaquuqaha iyo wajibaadyada bulshooyinka aan loo adeegin

## Si wanaagsan ugu haynta dadka bulshooyinkooda

Illaalada bulshada ku saleysan, adeegyada taageerada iyo daaweynta waa la mudnaan siiyay, qoysk—xudun u ah, dhaqan ahaan badqab ah oo ku haboon noloshada dadka—ku dhow halka aad ku noolyihiin, shaqeynta iyo ciyaaro. Nidaamka la habeeyay tan waxay u muuqan kartaa:

- Adeeg gaarsiinta la hormariyay oo adeegyada caafimaadka oo dhan ah, oo ay ku jiraan ka jawaabida, adeegyada dhijitaalka, iyo shabakadaha isbitaalka, iyo aqoonsashada iyo sheegida kala duwanaa aan sabab laheyn ee daryeelka caafimaadka
- Adeegyada caafimaadka lama carqaladeyn, iyo dadka waxay dareemaan badqab lagu helayo daryeelka

## Hubinta nidaam caafimaad oo waara dhaqaala ahaan

Illaha waxaa lagu maareeyaa oo lagu qoondeeyaa qaab gaarsiiso heerarka ugu wanaagsan ee suurto-galka ah ee caafimaadka dad weynaha iyo sinnaanta ku jirto illaha iyo maalgelinta la heli karo, hadeer iyo mustaqbalka. Nidaamka la habeeyay tan waxay u muuqan kartaa:

- Isbadelka lagu gaarsiyo qaab yareynayo qatarta lagu sii wadayo daryeelka
- Mudnaanada jiray iyo barnaamijyada waa la joogteeyaa

## Embedding Te Tiriti o Waitangi oo nidaamka caafimaadka oo dhan ah

Māori waxaa u suurto-galeyso inay ku dhaqmaan awooda ay u leeyihiin caafimaadkooda iyo faydada qabka oo ay ku gaaraan natiijooyinka caafimaad loo dhanyahay oo qaabab u suurto-geliyo Māori inay ku noolaadaan, u kobcaan iyo u koraan sida Māori. Nidaamka la habeeyay tan waxay u muuqan kartaa:

- Hogaaminta la xoojiyay ee Māori iyo go'aan gaarista
- Helitaanka la kordhiyay ee adeegyada xudun u ah kaupapa Māori iyo qoysk

## Hormarinta caafimaadka shaqaalaha mustaqbalka

Korinta iyo hormarinta shaqaale adkeysa leh, kala duwan, oo waara ee ka jawaabi karo baahiyada dadka iyo qoysk oo ay matalaan bulshada ay u adeegayaan. Nidaamka la habeeyay tan waxay u muuqan kartaa:

- Adeegyada badqabka dhaqan ahaan ee saldhiga u ah oo ku qaabeysan te ao Māori
- Saameynta shaqaalaha caafimaadka waa la yareeyaa, iyo shaqaalaha waa la taageeraa

## Dhidib u taagida guusha nidaam caafimaad mustaqbalka

Dhaqan cusub iyo hab dhaqan, lagu aasaasay Te Tiriti, waxaa loo abuurayaa in lagu xoojiyo xoog saarida ka hortagida, illaalinta iyo sare u qaadida faydada qabka dadka iyo qoysk. Nidaamka la habeeyay tan waxay u muuqan kartaa:

- Si wadajir u shaqeynta iyo iskaashiga bulshooyinka, iyo ururada kale
- Codadka macmiilka, qoyska iyo bulshada waxaa lagu muujinayaa nidaamka—hormarinta hormarka ku aadan sinnaanta helitaanka, tayada daryeelka iyo natiijooyinka